



Xog-ururinta 2022-2023 ee Dugsiyada Guulaystay ee PPS waxa ay ururisaa jawaab-celinta ardayga, qoyska, iyo shaqaalaha PPS

Markay tahay Isniinta, Janaayo 23, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay bilaabi doonaan Xog-ururinta Dugsiyada Guulaystay taasi oo noo saamaxaysa inaanu ururino xog si aanu go'aano xogogaal ah uga qaadano jawiga iyo dhaqanka dugsiya.

Afar qaybood oo kamid ah bulshada PPS ayaa ka qayb qaadan doona xog-ururinta qarsoon:

- 1) ardayda ku jirta fasallada 3 illaa 12 waxa ay dabooli doonaan xidhiidhada macallinka-ardayga, dareen ka mid ahaansho, badbaadada iyo cimilada dugsiya, ka qaybqaadashada, baraarugsanaanta dhaqan, iyo kala duwanaanshaha iyo ka mid ahaanshaha;
- 2) dhamaan qoysaska PPS waxa ay dabooli doonaan hagaagsanaanta dugsiya, cimilada dugsiya, carqaladaha ka qaybqaadashada, iyo badbaadada dugsiya,
- 3) dhamaan shaqaalaha PPS waxa ay dabooli doonaan cimilada dugsiya, xidhiidhada, waxbarista ardayda, caqliyadda koritaanka, xidhiidhada shaqaalaha-qoyska, iyo badbaadada dugsiya, iyo
- 4) dhammaan hoggaamiyayaasha dhismaha pps waxa ay dabooli doonaan cimilada dugsiya, xidhiidhada shaqaalaha-qoyska, xidhiidhada hoggaanka degmada, ka qaybqaadashada degmada ee guud, waxbarashada xirfadeed, jawaab-celinta iyo tababaridda, iyo ka qaybqaadashada shaqaalaha.



Xog-ururinta Dugsiyada Guulaystay waxa lagu dhamaystiri doonaa onlayn ahaan waxana laga dhigi doonaa mid lagu helayo linki. Ardayda waxa la siin doonaa linkiga, lambarka sirta ah ee ay ku galayaan iyo wakhti inta lagu gudo jiro maalin dugsiyeedka si ay u dhamaystiraan xog-ururinta. Qoysasku waxa ay xidhiidh ka heli doonaan dugsiyadooda iyaga oo ku helaya linkiga xog-ururinta. Hoggaamiyayaasha shaqaalaha iyo dugsiya waxa ay heli doonaan linkiga xog-ururinadooda xiga. Xog-ururinta Dugsiyada Guulaystay waxa ay ku qaadan doontaa shakhsiyaadka celcelis ahaan 15-30 daqiiqo si loo dhamaystiro waxana lagu heli karaa Ingiriisi, Isbaanish, Raashiyaan, Soomaali, Fiitnaamiis iyo Jayniis. Nuqullada waraaqaha waxa diyaarin doona dugsi walba marka laga dalbado.